

# **Laga bilaabo 22-ka Maayo, 2023, dheefaha SNAP ayaa la magi karaa haddii aad ahayd dhibbane ay ku dhacday xatooyo elektaroonig ah oo dheefahaaga laga xaday kaarkaada EBT.**

## **Haddii dheefahaaga la xaday, imminka qaad tallaabo:**

- **Haddii aad ogtahay in dheefahaaga la xaday intii u dhaxaysay 1-da Oktoobar, 2022, iyo 22-ka Maayo, 2023**, codso hadda magidda dheefaha . Codsigaaga waa in la helaa ugu dambeyn 21-ka Juun, 2023. Dheefaha la xaday kahor 1-da Oktoobar lama magi karo.
- **Haddii aad ogaato in dheefaha la xaday 22-ka Maayo, 2023 kadib**, isla markiiba xir kaarkaaga EBT, hel lambar sireed (PIN) cusub oo codso magidda dheefaha. Codsigaaga waa in la helaa ugu dambayn 30 maalmood kadib laga bilaabo maalinta aad ogaatay in dheefahaaga la xaday.

## **Sida loo xiro kaarkaaga:**

- **Waqtiyada saacadaha shaqada ka baxsan:** Ka wac khadka bilaashka ah ee adeegga macmiilka ee 24-saac shaqeeya lambarka 1-888-997-4447 si aad u xиро kaarkaaga oo aad u ilaashato dheefahaaga. Kadib wac khadka kaar beddelka ee hoose inta lagu gudajiro saacadaha shaqada si aad u hesho kaar iyo lambar sireed (PIN) cusub.
- **Inta lagu gudajiro saacadaha shaqada:** Ka wac khadka kaar beddelka lambarka 1-855-328-6715 si aad u codsato kaar beddel ah. Khadka kaar beddelka wuxuu furan yahay Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 8:30 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo. Boostada ayaa laguugu soo diri doonaa kaarka beddelka ah, badanaa shan maalmo shaqeed gudahooda.

## **Sida loo cadsado magidda dheefaha:**

- **Booqo xafiiska maxalliga ah.** Ka hel xafiis kuu dhow barta <https://www.oregon.gov/dhs/Offices/Pages/one-services.aspx>
- **Wac** 800-699-9075
- **U dir foomka codsiga ee la buuxiyay** iimaylka [Oregon.Benefits@odhsoha.oregon.gov](mailto:Oregon.Benefits@odhsoha.oregon.gov)
- **Ku dir foomka codsiga ee la buuxiyay** boostada:  
ONE Customer Service Center  
PO Box 14015  
Salem, OR 97309

Hel foomka codsiga, ciwaanka boostada iyo macluumaad dheeraad ah adoo adeegsanaya koodhka QR ama gujoraaca hoose:

<https://www.oregon.gov/dhs/assistance/food-benefits/pages/replacement%20-benefits.aspx>

